



Bisha Wacyigalinta Caafimaadka Maskaxda: Macluumaadka iyo Agabyada Addeegyada Lagu Taageerayo Ardayda PPS

Maayo 14, 2021

Maayo Waxa Weeye Bisha Wacyigalinta Caafimaadka Maskaxda. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an inay u damaashaadaan aqoonsiga ka qeybqaadashada sidii kor loogu qaadi lahaa fayoaqabka iyo taageerada dhammaan ardaeydeena inay ahaadaan kuwa caafimaad qaba maskax iyo jir ahaanba.

Addeegyada Taageerada Ardayda PPS waxay iskaashi wada shaqo la leeyihiin shaqaalaha iyo saaxiibadooda sidii loo siin lahaa addeeyo fara badan oo kala gedisan, marka laga bilaabo shaqaalaha bulshada iskuuladeena iyo la-taliyaasha bulshadeena ee iskaashadaan. Si aad u hesho addeegyada aad ka heli karto iskuulkaaga, waxaad booqataa <http://ppsfamilysupports.com/>.

Waxaanu bixin doonaa bisha Juun kulan-shaqo oo ku saabsan ka hortago ismiidaaminta (in nafta la iska gooyo) oo ay hoggaaminayaan da' yartu; waxaan u rajeyneynaa ardayga dugsiya hoose ama sarre inuu tixgalin siin doona inuu ka qeybqaato doodani lagama maarmaanka ah. Macluumaad dheeraad ah kuwaasi oo la raaco.

Waxaa intasi dheer, halkan waxaad ka heleysaa agabyada macluumaad dheeraad ah oo aan jecelnahay inaan idinla wadaagno:

- [App Agayada Dhallinyarada](#) Wargalinta ay dhallinyarada dhallinyaro ahaan is waragalyaan. Waxaad bilaash kala soo degi kartaa barnaamijyada Apple ama Android.
- [Taageerada Fayoaqabka Bulshada](#) (waxaa ka mid ah khadad telefoon oo ay qoysasku wacayaan sida,)
 - [Isbaanish](#)
 - [Fiitnaamiis](#)
 - [Shiine](#)
 - [Ruush](#)
 - [Soomaali](#)
- [Ka soo kabashada, Waxbarashada, iyo Waxqabadka Caafimaadka Noliisha \(REHL\)](#)
- [Midowga Isbahaysiga Jirada Maskaxda \(NAMI\)](#)

Waxaan idiin rajeyneynaa waalid ahaan inaad aqoonsan doontaa dariiqo fara badan oo aan Addeegyada Gargaarka Ardayda PPS u caawin karo ardaygaaga. Mahadsanid!